

# NSW FIRE BRIGADES

## KA MAMNUUCIDA DABKA OO DHAN NSW

Fact Sheet 6 – Community Risk Management. Revised 1/11/2005.



### Facts

Dabka keymaha waxaa laga yaabaa inuu fido oo uu sababo waxyeelo maalmaha marka ay cimiladu aad u kulushahay, qalalan tahay ama ay dabeylo leedahay. Tani aad ayey u sareysaa maalmaha dabka. Mamnuucin dhan oo dabeed ayaa lagu dhawaaqey maalmahan si loo yareeyo waxyeelada hantida iyo degaanka .

### Waa maxay mamnuucida Dabka oo dhan?

Inta lagu jiro mamnuucida Dabka oo Dhan, wax dab ah in lagu shido ma aha bannaanka. Ogolaanshaha dab in la shido waa la joojinayaa inta lagu jiro mamnuuca dabka oo dhan. Mamnuucida waxay khuseysaa incerators iyo babakuyuuga guba shidaal adag sida xaabada iyo dhuxusha.

Waxaad isticmaali kartaa gaas ama babakiyuuga korontada ah, laakiinse oo keliya haddii...

- Ay ku taal meel la degan yahay oo ay u jirto guriga ama meesha la degan yahay 20 mitir
- Ay tahay maalin joog oo uu ogol yahay golaha dawlada hoose, Baaggaga qaranka ama Keymaha dawlada gobolka.
- Uu si toos ah u kontoroolayo qof weyni
- Dhulka ilaa 2 m ee baabakiyuuga laga baneeyo dhammaan alaabta guban karta
- Aad heysato biyo kuu dhow oo aan dhammaaneynin lana helayo

### Goorma ayaa mamnuucid dab oo dhan lagu dhawaaqaa?

Ammaanka dadweynaha dartii, mamnuucida dabka oo dhan waxaa lagu dhawaaqaa maalmaha laga yaabo inuu dabku baxsan karo oo ay adkaan karto in la xukumo. Tusaale khatarta dabka waxaa dhaliya wada jirka geedaha qalalan iyo hawada kulul, qalalan ee dabeysha leh. Ha'yada saadaasha hawada waxay bixisaa tallo ku saabsan saadaalinta xaaladaha hawada, darajo siinta khatarta dabku intay le'eegtahay inta lagu jiro xiliga khatarta dabka keymaha.

Guddoomiyaha Adeega Dabka ee Baadiyaha NSW wuxuu ku dhawaaqaa mamnuucitaan dab oo dhan oo ku saleysan talladaan iyo macluumaad kale. Go'aankan waxaa badanaa la sameeyaa 5 galabnimo ee galab kasta inta lagu jiro xiliga khatarta dabka keynta mamnuucida dabka ee dhana waxay khuseysaa maalinta soo socota, oo ka bilaabaneysa habeen badhkii kuna dhammaaneysa 24 saac. Guddoomiyaha RFS wuxuu sidoo kale masuul ka yahay ka deynta mamnuucitaanka dabka oo dhan .nashaadyo badan ayaa laga yaabaa in laga dhaafto mamnuucitaanka dabka oo dhan, sida shaqada tasiilaadka gagaarka degdega ah ama dababka xafladeed. Kuwan waxaa lagu faahfaahiyaa wargeyska Dawlada NSW wakhti kasta oo lagu dhawaaqo mamnuucitaanka dabka. Mamnuucitaanka dabka ka dhaafida waxaa sidoo kale lagu qoraa website ka RFS ee ah [www.rfs.nsw.gov.au](http://www.rfs.nsw.gov.au).

Sidii aad ku heli lahayd meesha iyo marka Mamnuucitaan Dab oo dhan lagu dhawaaqey?

Jeegaree goobta Dabka ee NSW ee aad joogto adoo isticmaalaya khariirada warqadan la socda. Mamnuucitaanka dabka oo dhan waxaa loogu dhawaaqaa iyadoo loo eegayo goobaha dabka ee NSW, oo ay ku jirto tiro ka mid ah goobaha dawlada hoose ee isku hawada ah terrain iyo arimaha maamulida dabka . ka dib waxaad ka jeegareyn kartaa haddii uu Mamnuucitaanka dabka oo dhan uu khuseeyo adoo:

- Wacaya 1800 NSW RFS (1 800 679 737), waa lambar bilaash ah oo leh macluumaad la duubay oo gobolka oo dhan ah sheegayana in Dabka oo Dhan la Mamnuucay.
- Jeegareynaya website ka RFS Khatarta hadda jirta ee Dabka iyo Khariirada Mamnuucitaanka Dabka oo Dhan [www.rfs.nsw.gov.au](http://www.rfs.nsw.gov.au)
- Ka jeegareynta warbixinaha hawada raadyaha, TV iyo wargeysyada.
- Wacaya Xarunta Kontoroolka Dabka ee RFS ee xaafadaada saacadaha shaqada
- La xiriiraya saldhiga Dabka ee NSWFB ee xaafadaada

### Wada shaqeynta Dab demiska NSW & Adeega Dabka ee Baadiyaha NSW

Wixii macluumaad ah ee dheeraad ah la xiriir saldhiga dabdemiska ee xaafadaada ama Xarunta Kontoroolka Dabka ama gal:

[www.fire.nsw.gov.au](http://www.fire.nsw.gov.au) ama [www.rfs.nsw.gov.au](http://www.rfs.nsw.gov.au)

### Waa maxay goobaha Dabka ee NSW?

Ilaa Ogoosto 2004 nidaam cusub oo loogu dhawaaqayo Mamnuucida Dabka oo Dhan laguna gaarsiinayo macluumaadka hawada ee dabka ayaa la isticmaaley. ku dhawaaqidu waxay hore ugu saleysnaa jirtay degmooyinka Saadaalinta Hawada ee Ha'yada Saadaasha . Ku dhawaaqidu waxay hadda ku saleysan yihiin Goobaha Dabka ee NSW. Goobaha Dabka ee NSW waa ka yar yihiin waxayna ku saleysan yihiin xadadadka goobaha dawlada hoose. Tan micnaheedu waxaa weeye mamacluumaadka hawada ee dabka iyo mamnuucida Dabka oo dhami waxay khaas ku yihin xaaladaha degaankaas khaaska ah. si aad u ogaato goobabta fsbka ee NSW ee aad joogto , jeegaree khariirada ku lifaaqan warqadan.

**Ganaaxyo iyo ciqaabo** Shidida dab maalin dabkoo dhami mamnuuc yahay waxay keeneysaa ganaax dhan ilaa \$5000 iyo/ama 12 bilood oo xarig ah. ciqaabta dabka baxsada oo waxyeleeda ama buburinaya naf, hanti ama degaan waxay keenaysaa dabab kganaaxyo ka waaweyniyo xarig ugu badnaan \$100,000 iyo/ama 14 sanno. dacwad sharciga madaniga ah ayaa sidoo kale lagu soo oogi kartaa qofkaan ka masuulka h dabka oo ay ku soo oogayaan kuwa doonaya magdhaw khasaaridhii soo gaarey ah.

## GARGAARKA DEGDEGA AH WAC 000